

Isbeddellada Guud ee ugu Muhiimsan

Caddadka # 36

Warsidaha Toddobaadlaha ah ee Arrimaha Bani'aadamnimada

11-18 September 2009

Waxda Maareynta Xogta Biyaha iyo Dhulka ee Soomaaliya (SWALIM) ee hay'adda FAO Somalia ayaa sheegtay in dalka badiisu ay u badan tahay in uu helo roobab ku dhow intii caadiga ahayd ilaa iyo kuwo ka badan intii caadiga ahayd taasna ay sabab u tahay xaaladaha cimilada ee El Nino muddada u dhaxaysa Oktoobar – Disembar 2009. Roobabka ayaa ay u badan tahay in ay la mid noqdaan kuwii xilli-roobaadkii 2006dii, ee keeney fatahaado ballaaran iyo barokaca in ka badan 300,000 oo qof.

Toddobaadka dhexdiisa, waxaa Muqdisho ka dhacay laba dhacdo oo la xiriira ammaanka. 17kii Sebtembar, muqaawamada ayaa weerar is-miidaamin ah ku qaadey xarunta ciidamada Hawlgalka Ciidanka Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) ee ku taalla Garoonka Dayuuradaha ee Caalamiga ah ee Muqdisho, kaas oo ay ku dhinteen 21 qof ayna ku dhaawacmeen ugu yaraan 40 kale. Waxaa lagu soo warramey in kuwa weerarka soo qaadey ay xarunta ku soo jiireen laba gaari. Wakiilka Gaarka ah ee Midowga Afrika ayaa war-saxaadeed uu isla maalintaa soo saarey ku cambaareeyey weerarkaa waxaana uu ku celiyey in Midowga Afrika ay ka go'an tahay nabadda iyo dib-u-heshiisiinta Soomaaliya. Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey, Ban Ki-Moon ayaa isna muujiyey sida uu uga naxay uuna uga caroodey weerarkaa. Midowga Yurub, Urur-goboleedka IGAD, Jaamacadda Carabta, Qaramada Midoobey, Norway iyo Mareykanka ayaa war-saxaafadeed ku muujiyey sida ay uga xun yihiin.

11kii Sebtembar, ayaa cusbitaal ku yaalla koonfurta Muqdisho waxaa ku dhacay hoobiyeyaal oo halkaa ku diley 15 curyaamiin ah oo dhaawacayna 17 kale, oo ay carruur ku jiraan. Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeynta Cas (ICRC) ayaa war-saxaadeed ay soo saartey 15kii Sebtembar ku cambaareysey weerarkaa. Ilaa bishii Jannaayo, labada cusbitaal ee qalliinka sameeya ee Muqdisho ku yaalla ee ay taageerto ICRC ayaa daweeyey ilaa 3,700 oo bukaanno dagaal ku dhaawacmey ah, kuwaas oo ay ka mid yihiin 350 carruur ah iyo ku-dhowaad 600 oo haween ah.

Dagaalka Muqdisho ayaa weli sii barokicinaya rayidka. UNHCR ayaa sheegeysa in ilaa 1dii Luulyo ay 83,000 oo qof ay ka barokaceen guryahoodii ku yaalley Muqdisho iyada oo 55,600 ay ka baxeen magaalada halka 27,300 ay u guureen goobo xoogaa ka ammaan roon oo isla Muqdisho ah.

12kii Sebtembar, saddex qof oo rayid ah ayaa dhintey halka 10 kalena ay dhaawacmeen ka dib markii booliisku ay xabado nool ku fureen dad ku mudaaharaadayey xarunta baarlamaanka ee Hargeysa, Somaliland horteeda. Dareenka siyaasadeed ee Somaliland ayaa kacsanaa ka dib markii dib loo dhigey doorashooyinkii guud ee ay ahayd in la qabto dhammaadka Sebtembar.

Waxqabadka

Toddobaadka dhexdiisa, WFP iyo la-hawlgalayaasheeda waxa 436 metrik ton oo cunto ah ay Puntland ugu qaybiyeen 38,988 ka-faa'iideystayaal ah taas oo hoos imaaneysey barnaamijyada quudinta dheeriga ah, quudinta dheeriga ah ee la beegsado, tababar shaqo ku beddelesho, dadka la nool HIV/AIDS iyo quudinta hay'adaha.

UNICEF iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa wada ka-shaqeysiinta iyo dayactirka shabakadda qaybinta biyaha ee Afgooye iyaga oo biyo ammaan ah oo la cabbo siinaya in ka badan 220,000 oo Dad Gudaha Ku Barokacay ah. Intaa waxaa dheer in toddobaadka dhexdiisa, ilaa 37,000 oo dad gudaha ku barokacay ah ayaa heley musqulo ka dib markii loo qaybiyey shubka ballaaran ee musqulaha lagu daboolo, halka 1,500 qof oo dad gudaha ku barokacay ah ay koonfurta iyo waqooyiga Muqdisho ku heleen jirkaanno iyo kiniiniga nadiifinta biyaha ee *acqua tab* iyo wabarashada nadaafadda. Ilaa 500 oo qoyska oo magaalada Luuq ee gobolka Gedo ku nool ayaa la siiyey 1,000 xabbo oo saabuun ah iyo 60,000 oo kiniiniga biyaha lagu daweeyo ee *acqua tab* ah. Koloriin ku dariddii 40 ceel oo ku yaalla 20 tuulo oo lagu beegsanayo 16,000 oo qof ayaa ka socota degmada Luuq.

NGO-ga degaanka ee SPDS ayaa biyo-dhaamin u bilaabey 14 tuulo oo ku yaalla gobollada Mudug iyo Nugaal. Badi tuulooyinka abaartu saameysey ee fogfog ee ku yaalla gobollada ayaa ay biyo yaraani haystaa.

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org. Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org

